Dib Ugu Maalgelinta Keydadka Lacageed Bulshada - Sookoobista Cilmi-baarista Ka Dhaafida Shuruudaha Cilmi-baaris ee 1115

Sookoobista Codsiga

Gobolka Oregon wuxuu codsan doonaa oggolaanshaha CMS si uu u galo heshiis cusub oo “wadaagista keydadka lacageed” ah, kaasoo Oregon ku ballanqaadayo xaddidaad loo dhan yahay oo lagu dhiirado in lagu sameeyo kobaca kharashka ku baxa Medicaid, oo CMS waxay ku bixin doontaa maalgelin horubixin ah oo socota keydadka lacageed ee la saadaaliyay si loo taageero dadaallada xaqsoorka caafimaadka ee Oregon inta lagu gudojiro muddada ka-dhaafida, oo ay ku jiraan tijaabooyinka “aagagga xaqsoorka caafimaadka” ee cusub.

Dhibaatada iyo Araarta

Sida ku cad ka-dhaafida shuruudaha ee 1115 ee 2012 iyo 2017, gobolka Oregon waxaa ka go’an ka yareynta kobaca heerka kharashka ku baxa xubin kasta bishiiba (PMPM) laba boqolkiiba - laga soo bilaabo celceliska qaran ee la saadaaliyay ee 5.4% ilaa 3.4%. Tan iyo maanta, gobolka Oregon wuxuu ku guuleystay inuu gaaro ballanqaadkan, isagoo ku hayay kharash gareynta isla ama ka hoose 3.4%, oo dadaallada lagu doonayo in lagu “qalloociyo xoodinta kharashka” ayaa weli la siiyaa ahmiyadda koowaad ee gobolka. Gobolka Oregon wuxuu taariikh ahaan gaaray bartilmaameedkan kharasheed iyadoo loo marayo nooca cusub ee dib-u-habeynta caafimaadka, sida ay u hirgeliyeen Ururada Daryeel ee Isku Xiran (CCOs), kuwaasoo lagu dhiirigeliyay inay joogteeyaan bixinta daryeelka tayada sare leh iyadoo la xaddidayo kharashaadka nidaamka muddo dhow iyo muddo dheerba.

Gobolka Oregon tan iyo markaas wuxuu ku ballariyay habkan suuqa ganacsiga, iyadoo loo adeegsanayo Bartilmaameedka Kobaca Kharashka Daryeelka Caafimaadka ee Waara ee gobolka oo dhan, kaasoo la bilaabay hirgelintiisa 2021. Ballanqaadkan sharci ahaan la igmaday wuxuu u horseedi doonaa keydad lacageed oo ballaaran dawladda federaalka iyadoo la yareyn doono heerka kobac ee kharashaadka daryeelka caafimaadka ee Medicaid iyo Medicare– keydadka lacageed ee dhaafsan ballanqaadkii taariikhiga ahaa ee Oregon ee heerka kobac ee ahaa ilaa 3.4% gudaha Medicaid. Taas baddalkeeda, tani waxay horseedi doontaa hoos u dhac muuqda oo ku yimaada lacagaha dawladda federaalka ee soo gala nidaamka caafimaadka Oregon--oo loo isticmaali lahaa in lagu bixiyo adeegyo iyo barnaamijyo hal-abuur ah oo loogu talagalay dadka aadka u nugul ee ku nool Oregon.

Marka isbarbardhig lagu sameeyo, Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) wuxuu dejiyay hadaf istaraatiiji ah oo meesha looga saarayo xaqsoor la'aanta caafimaadka ugu dambeyn 2030. Gaarista hadafkan ayaa u baahan doona weecin degdeg ah oo muhiim ah

Waa maxay Barnaamijka Bartilmaameedka Kobaca Kharashka Daryeelka Caafimaadka ee Waara?

Sannadkii 2019, gobolka Oregon wuxuu ballaariyay dadaallada xakameynta kharashka ee dhaafsan Medicaid ee loogu talagalay dhammaan bixiyeyaasha, iyadoo la aasaasayo Barnaamijka Bartilmaameedka Kobaca Kharashka Daryeelka Caafimaadka ee Waara, iyadoo ujeeddadu ahayd in dhammaan bixiyeyaasha iyo ururrada bixiyeyaasha ah ee waaweyn ee ka jira gobolka lagula xisaabtamo kobaca kharashka waara.

Guddiga Hirgelinta Barnaamijka ayaa dejiyay bartilmaameedka kobaca kharashka si uu u noqdo bartilmaameedka miisaaniyadeed oo loogu talagalay heerka sannadlaha ah ee kobaca wadarta kharashka ku baxa daryeelka caafimaadka ee gobolka.

Hadduu gobolka Oregon gaaro bartilmaameedkiisa, kobaca kharashka daryeelka caafimaad ee sanadlaha ah ee gobolka wuxuu noqon doonaa isla ama ka hoose 3.4% sannadka 2021-2025 iyo 3.0% sannadka 2026-2030 (Eeg Jaantuska 1-aad).

in lagu sameeyo barnaamijyada iyo adeegyada taageeraya dadka wajahaya xaqsoor la'aanta caafimaadka. Arrimaha bulsheed ee sababa xaqsoor la'aanta caafimaad inta badan waxay dhaafsan yihiin nidaamka daryeelka caafimaadka, oo maalgashiyo ballaaran ayaa wanaajin karaan caafimaadka iyo fayoqabka bulshada oo dhan.

Jaantuuska 1-aad.



Himilada, Hadafyada iyo Geedi-socodka:

Himilada:

Dib ugu maalgelinta keydadka lacageed ee dawladda federaalka ee Gobolka Oregon uruuriyey bulshooyinka si loo yareeyo xaqsoor la'aanta caafimaadka.

Hadafyada

- Dib u maalgelinta keydadka lacageed iyadoo loo marayo dib-u-habeynta caafimaadka ee ku wajahan bulshada si loo wanaajiyo bay'adda bulshada, dhaqaalaha iyo jirka.
- Siinta ahmiyadda maalgashiyada waaweyn ee bartilmaameedkoodu yahay in meesha laga saaro xaqsoor la'aanta caafimaadka.
- La hawlgelida hoggaamiyeyaasha bulshada si loo aqoonsado loona bilaabo istaraatiijiyado lagu ciribtiro xaqsoor la'aanta caafimaadka

Geedi-socodka iyo Istaraatijiyadaha Suurtogalka ah ee Lagu Gaarayo Hadafka

Tallaabooyinka hoose waxay dhigayaan sida Oregon u filanayo inuu u gaaro hadafyada. Nidaamkan waxaa la gaari doonaa iyadoo la isku darayo istaraatiijiyado ka dhaafid iyo ka dhaafid la'aan.

Tallaabada 0 (socota) Hirgelinta Barnaamijka Bartilmaameedka Kobaca Kharashka Daryeelka Caafimaadka ee Waara

Guddiga Hirgelinta Bartilmaameedka Kobaca Kharashka Daryeelka Caafimaadka ee Waara ayaa soo saaray warbixin bishii Janaayo 2021 isagoo tirinaya tallooyinka ku saabsan hirgelinta barnaamijka. OHA waxay la shaqeyn doontaa bixiyaha iyo ururada bixiyaha ah si loo hirgaliyo tallooyinka ay soo bandhigeen guddiga.

Tallaabada 1-aad. Haynta kaydadka lacageed ee la gaaray iyadoo loo marayo hoos u dhigista heerka kobaca kharashka daryeelka caafimaadka ee caymiska Medicaid iyo Medicare Advantage

OHA wuxuu la shaqeyn doonaa wada-hawlgaleyaasha iyo CMS si ay u soojeediyaan hannaan lagu xisaabiyo keydadka lacageed ee dawladda federaalka Keydadkaas ayaa markaa kadib lala wadaagi doonaa gobolka. Iyadoo aan la helin heshiiska noocaas ah, ballanqaadka ka jira gobolka oo dhan si loo yareeyo kobaca kharashka suuqyada oo dhan, iyo ballanqaadka xooggan ee hoos loogu dhigayo heerka kobaca Medicaid, ayaa sababi doona khasaaro ku timaado lacagaha dawladda federaalka ee ku wajahan Oregon.

Wadarta keydadka lacageed ee Medicaid ee muddada shanta sanno ee ka-dhaafida shuruudaaha ah ee ka dhasha bartilmaameedka kobaca kharashka ayaa lagu qiyaasayaa inay kor u dhaafayaan $350 milyan keliya suuqa Medicaid; waana la labalaabi karaa haddii Medicare Advantage lagu daro.

Tallaabada 2-aad. Ka faa'iideysiga hoggaanka bulshada si loogu maalgeliyo lacagahaas noocyo hal-abuur leh oo gaaraya dhammaan dadka wajahaya xaqsoor la'aanta

Xaqsoor la'aanta caafimaadka inta badan waxaa dib loogu aaneyn karaa helitaanka aan loo sinneyn ee awoodda iyo go'aan qaadashada. Bulshooyinka inta badan ay saameysay xaqsoor la'aanta caafimaadka ayaa taariikh ahaan looga diiday door go'aan ka gaaris halka iyo sida loo maalgalinayo lacagaha dadweynaha. Dulmigan taariikhiga ah iyo cunsuriyadda nidaamsan waxay dhalisay jiilal bulsho oo maalgelin laga qadiyay. Qaadashada hab bulshada ay door hoggaamineed ka qaataan si dib-u-maal-gelin loogusameeyo keydadkan lacageed ee la wadaago ayaa u beddeli doonta dheelitirka awoodda waxayna kordhin doontaa inay bulshooyinka taariikh ahaan la dulmiyo ay helaan kheyraadka wax looga qabanayo arrimaha bulsheed ee caafimaadka iyo xaqsoorka.

Siyaasadaha iyo Istaraatijiyadaha:

Hoos waxaa ku yaala liiska siyaasadaha iyo istaraatijiyadaha suurtogalka ah.

Istaraatijiyadaha ka-dhaafida la soojeediyay

Sameynta hannaan loogu talagalay keydadka lacageed ee la saadaaliyay ee Medicaid iyo Barnaamijyada caymiska Medicaid iyo Medicare Advantage ee ka jira Oregon iyo ku haynta keydadkaas heerka gobolka ka jira.

Gobolka Oregon wuxuu codsanayaa oggolaanshaha CMS si uu u galo heshiis cusub, kaasoo Oregon ku ballanqaadayo xaddidaad loo dhan yahay oo xooggan in lagu sameeyo kobaca kharashka ku baxa Medicaid, oo CMS waxay ku bixin doontaa maalgelin horubixin ah oo socota keydadka lacageed ee la saadaaliyay si loo taageero dadaallada xaqsoorka caafimaadka ee Oregon inta lagu gudojiro muddada ka-dhaafida. Tani waxay ku dhisnaan doontaa aasaaskii “2 boqolkiiba

baaritaanka" ee Oregon (PMPM ayaa saarnayd koritaanka Medicaid) laga bilaabo dhaafitaanka 2012 iyo 2017 waxayna la jaanqaadeysaa barnaamijka bartilmaameedka kobaca qarashka daryeelka caafimaad ee waara ee Oregon.

Hannaanka:

Hannaanka gobolka Oregon uu soojeediyay ayaa ah mid loo wada dhan yahay marka loo eego in kharashaadka Medicaid ay ku xirnaan doonaan bartilmaameedyada kobaca kharashka (eeg qeybta hoose) iyo aadka u xooggan maxaa yeelay bartilmaameedka kobaca kharashka wuxuu hoos ugu dhacayaa 3% sannadka 2026 iyo 2027. Waxaa intaas dheer in gobolka Oregon codsanayo oggolaanshaha CMS si uu u galo heshiiska kaydadka lacageed ee la wadaago, kaasoo CMS ay ka bixin doonto qayb ka mid ah dhimista kharashaadka ee saxda ah e eka soo baxay kobaca kharash ee la dhimay ee qiimaha gorgortan ee Medicare Advantage ee CMS iyadoo ugu wacan tahay bartilmaameedka kobaca kharashka ee Oregon. Kaydadka lacageed ee la wadaago ayaa sidoo kale taageeri doona dadaallada xaqsoorka caafimaadka ee Oregon.

Geedi-socodka:

OHA iyo CMS waxay qiimeyn doonaan waxqabadka guud ee Oregon marka loo eego bartilmaameedka kobaca kharashka loogu talagalay Medicaid shanta sanno ee muddada ka-dhaafida shuruudaha ee qeybta ka ah qiimeynta. Gogolka Oregon ayaa gaari doona hadafka haddii, dhammaadka muddada ka-dhaafida shuruudaha, uu ku joogteeyay isku-darka kobaca qiimaha Medicaid isla bartilmaameedka ama ka hoose.

Noocyada keydadka lacageed ee Medicaid iyo Medicare Advantage waa in si fiican loogu sii turxaan bixiyo gudaha iyo iyadoo lala kaashanayo khubaro takhasus u leh oo dibbada ka ah mawduuca. Wadahadalo dheeraad ah oo laga yeesho miisaaniyadda iyo lala yeesho hoggaanka hay'adeed ayaa loo baahan yahay si loo go'aamiyo saamaynta warbixinta bartilmaameedka kobaca kharashka ay ku leeyahay CMS, iyo sidoo kale saamaynta iyo halista ay ku leedahay kaydadka lacageed ee la wadaago iyo xulashooyinka maalgashi ee la tixgelinayo. Waxa muhiim noqon doonta in la go'aansado in lagu daro khidmadda adeegga (Kaarka Furan) kaydadka lacageed ee la saadaaliyay.

Tani maxay uga dhigan tahay xubnaha OHP?

Xubnaha OHP waa inaysan ka arkin wax saameyn xun ah daryeelkooda iyadoo ugu wacan yahay heshiiskan iyo hannaanka loo xisaabiyay kaydadka lacageed ee la saadaaliyay. Ballanqaadka bartilmaameedka koboca kharashka ayaa dhiirrigelin kara bixiyeyaasha iyo CCO-yada si loo kordhiyo adeegyada qiimaha sare leh iyo/ama qiimaha jaban leh si loo gaaro bartilmaameedka kobaca kharashka. Barnaamijka Bartilmaameedka Kobaca Kharashka Daryeelka Caafimaadka ee Waara wuxuu ku guda jiraa sameynta Qaabdhismeed Korjoogteyn iyo Kormeer si loo hubiyo in tayada daryeelka uu ahaado mid isku mid ah ama hagaagsan.

Dib u maalgelinta kaydadka lacageed iyadoo la tijaabinaya "aagagga xaqsoorka caafimaadka"

Si loogu wareejiyo lacagta aagagga taariikh ahaan aan helin kheyraadka, gobolka Oregon wuxuu damacsan tahay inuu tijaabiyo hannaan maalgashi oo cusub oo ay dawladdu ku dhiseyso "aagagga xaqsoorka caafimaadka." Qeybahaan ay bulshadu aqoonsadeen ee ku dhex nool aaggaga la calaamadeeyay ee qeexan ayaa ka faa'iideysan doonaan iskaashiyada maxalliga ah si kor loogu qaado caafimaadka jireed iyo habdhaqameed ee xubnaha bulshada iyadoo laga shaqeynayo wanaajinta natiijooyinka qaybaha xaqsoorka iyo caafimaadka oo dhan, iyadoo hadafka guud yahay baa'bi'inta xaqsoor la'aanta caafimaadka. Geedi-socodka naqshadeynta aagagga xaqsoorka caafimaadka ayaa abuuri kara qorshe maalgashi oo isku xiran, ka dhaca gobolka oo dhan, ama wuxuu tilmaam u noqon karaa maalgelino goboleed oo ku habboon wax ka qabadka baahida bulshada.

Hannaanka iyo tusaalooyinka:

Bulshadu waxay naqshadayn doontaa maalgashiga iyo halbeegyada la adeegsado si loola socdo guusha Si loo qorsheeyo aagagga sinnaanta caafimaadka, bulshooyinku waxay isticmaali karaan Qorsheyaasha Qiimeynta Caafimaadka Bulshada ee Deegaanka iyo Qorsheyaasha Horumarinta Caafimaadka Bulshada si loo aqoonsado hababka ballaaran oo dhammaystiran oo, sida wadajirka ah loo mideeyay, oo si weyn u horumarin doonaan caafimaadka bulshada. Tusaalooyinka waxaa ka mid noqon kara kor u qaadista goobaha cagaaran iyo hagaajinta deegaanka la dhisay; kordhinta helitaanka taageerooyinka caafimaadka bulshada iyo maskaxda; iyo ballaarinta helitaanka daryeelka carruurta ee la awoodi karo iyo/ama guriyeynta. Waxaa intaas dheer, iyadoo ku xiran baahiyaha bulshada, waxay diirada saari karaan wax u qabashada dad gaar ah, sida carruurta. U oggolaanshaha bulshooyinka inay maalgeliyaan noocyada kala duwan ee taageero oo ay ogyihiin inay yihiin kuwa mudnaanta ugu sareysa leh, aagagga xaqsoorka caafimaadka ayaa abuuri doona waxqabad bulsheed iyo adkeysi.

Tusaale ahaan, wax ka qabashada arrimaha la xiriira isbeddelka cimilada ayaa laga yaabaa inay mudnaan siiyaan qaar ka mid ah bulshooyinka Oregon. Isbedelka Cimilada--waa qodobka ugu weyn ee xilli dab duureedka aan caadiga ahayn ee 2020 ee ka dhaca Oregon--inta badan si aan kala sooc lahayn ayuu u saameeyaa bulshooyinka midabka leh. Dab duureedkii 2020 ka dhacay Oregon wuxuu baaba'day bulshooyinka gobolka oo dhan, oo ay ku jiraan bulshooyinka Talent iyo Phoenix, kuwaasoo ahaa 90% Laatiinx. Kordhinta goobaha cagaaran iyo deegaannada kale ee la dhisay ayaa wanaajin kara saameynta isbeddelka cimilada. Intaas waxaa dheer, caddeynta isku xiraysa waqtiga banaanka lagu qaato iyo caafimaadka fiican ayaa mid muhiim ah (https://willamettepartnership.org/wp-content/uploads/2014/06/HealthFramework-Final-Reduced.pdf)

Kaqeybgelinta bulshada:

Gaarista himilada Oregon ee ciribtirka xaqsoor la'aanta caafimaadka sannadka 2030 waxay u baahan doontaa habab cusub, oo ula kac ah oo salka ku haya codka bulshada xilliga go'aan qaadashada. Si taasi loo gaaro, OHA waxay si qumman ula shaqeyn doontaa dadweynaha si loo aqoonsado sida bulshooyinka deegaanka ay hormuud ugu noqdaan dadaallada baahinta kheyraadka si loo wanaajiyo caafimaadka ahmiyadda leh iyo dadka aan adeegyada loo si buuxda u helin ee ku nool aag la calaamadeeyay.

Nidaamka iyo istaraatiijiyadda lagu fulinayo kaqeybgalkan dadweynaha waxaa si wada jir ah loo abuuri doonaa iyadoo lala kaashanayo Isbahaysiga Sinnaanta Caafimaadka ee Oregon (RHECs) iyo hay'adaha kale ee matalaya bulshooyinka la takooro iyo taariikh ahaan la dulmay, CCOs, isbitaalada, hay'adaha caafimaadka bulshada ee maxalliga ah, ururada adeegga bulshada, bulshada kale. ururada ku saleysan.

Tani maxay uga dhigan tahay xubnaha OHP? Xubnaha OHP way kaqeybqaadan karaan, ama wakiilan karaan ururada kale ee bulshada iyo u-doodeyaasha, si loo qorsheeyo geedi-socodka lagu dhisayo Aaggaga Xaqsoorka Caafimaadka ee gobolka. Qaar ka mid ah xubnaha OHP iyo xubnaha kale ee dadweynaha ee la nool bulshooyinkaas (weli lama go'aamin), maalgashiyadu waxay u horseedi doonaan natiijooyin caafimaad iyo fayoqab oo wanaagsan.

Isbahaysiyada Xaqsoorka Caafimaadka ee Goboleed (RHECs)

Bishii Luulyo 2011, OHA waxay aasaastay hindisaha RHEC si loo taageero deegaanka, waxqabadyo bulshada hormuud u tahay, waxqabadyo dhaqameed gaar ah si loo yareeyo xaqsoor la'aanta caafimaadka oo wax looga qabto arrimaha bulsheed ee saameeya caafimaadka Oregon.

Waqti xaadirkan lix RHEC-yo ayaa gaaray 11 degmooyin oo ku yaala Oregon iyo Qabaa'illada Midoobay ee Springs Warm. Shaqada isbahaysiyadu waxay daboolaysaa bulshooyin badan oo aan helin daryeel buuxa, oo ay ku jiraan dadka midabka leh, soogalootiga, qaxootiga, muhaajiriinta iyo shaqaalaha xilli beereed, dadka dakhligoodu hooseeyo, shakhsiyaadka naafada ah, iyo bulshada LGBTQ ee ku nool miyiga iyo magaalooyinka. Bulshooyinka midabka leh waxay RHEC-yada siiyaan mudnaan koowaad.

Dib ugu maalgelinta keydadka lacageed ahmiyadaha xaqsoor ee gobolka oo dhan

Si looga ciribtiro xaqsoor la'aanta caafimaadka, arrimaha bulsheed ee dhaafsan nidaamka daryeelka caafimaadka waa in wax laga qabtaa. Tani waxay u baahan tahay maalgelin miisaan culus leh, maalgashi ballaaran ah oo aan lagu gaari karin maalgashiyada yaryar ee heerka maxalli ah. Gobolka wuxuu sameyn doonaa geedi-socodka kaqeybgelinta dadweynaha si loo go'aamiyo dadaallada xaqsoor ee ka jira gobolka oo dhan oo inta badan lagu bixin doono lacagahaan.

Tusaalooyinka:

Bilow ahaan, fikradaha dadweyne ee tan iyo maanta waxay muujiyeen baahida weyn ee loo qabo **kor u qaadida shaqaalaha daryeelka caafimaadka si loo siiyo ldaryeelka jawaab-celinta dhaqameed leh.**

Sida laga soo xigtay Qiimeynta Baahiyaha Shaqaalaha Caafimaadka ee OHA ee dhowaan la sameeyay, shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee Oregon waa in la kala duwo oo deegaan ahaan loo kala qeybiyo. Kala duwanaanshaha jinsiyadeed iyo qowmiyadeed ee shaqaalaha daryeelka caafimaadka uma dhigmaan kala duwanaanshaha dadweynaha Oregon, iyadoo bixiyeyaasha Isbaanishka/Laatiinka, Afrikaan Ameerikaanka/Madowga, iyo Hindida Mareykanka/Dhaladka Alaska aan si buuxda loogu metelin xirfadaha daryeelka caafimaad ee shatiyeysan. Bilowga ilaa dhammaadka nidaamka daryeelka caafimaadka ee Oregon, kala duwanaanta badan ee shaqaalaha safka hore iyo maamulka ayaa loo baahan yahay si loo taageero barnaamijyada iyo siyaasadaha loo siman yahay. Intaas waxaa dheer, tirada bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka aad ayay u kala duwan yihiin gobolka oo dhan, iyadoo aaggaga miyiga/xuduudaha ay u badan tahay in aan si buuxda loogu adeegin marka loo eego magaalooyinka.

La-hawlgaleyaasha bulshada ayaa qiimeyn kara baahida shaqaale ee bulshooyinkooda--iyadoo xog iyo taageerooyin kale ay bixiyaan OHA, hadba sida loogu baahdo--si loo go'aamiyo sida loo maalgashan karo shaqaalaha jawaab-celinta dhaqameed leh oo u adeegi doona dadka aan taariikh ahaan helin bixiyeyaal ka turjuma asalkooda isir iyo qowmiyad.

Bulshooyinka qaarkood ayaa laga yaabaa inay leeyihiin baahiyo caafimaad oo habdhaqan oo la taaban karo. Qiimeynta Baahiyaha Shaqaalaha Daryeelka Caafimaadka ee OHA ayaa lagu ogaaday baahsanaanta bixiyeyaasha caafimaadka habdhaqanka ee shatiyeysan ay si weyn ugu kala duwan yihiin guud ahaan gobolka oo dhan, iyadoo bixiyayaashu ay yar yihiin marka loo eego qoys kasta oo jooga aaggaga miyiga/xuduudaha, iyo in dadka midabka leh aan si buuxda loogu metelin qeybaha shaqaalaha caafimaadka habdhaqanka. Bulshooyinka leh baahida shaqaale ee

caafimaadka habdhaqanka ayaa dooran kara inay diiradda saaraan ballaarinta bixiyeyaasha caafimaadka habdhaqanka, sida dhakhaatiirta dhimirka iyo cilmi-nafsiga, kuwaasoo ka turjumaya kala duwanaanta bulshada. Kordhinta helitaanka iyo adeegsiga Khubarada Fayo-qabka Asaaga ayaa ah qaab kale oo macquul ah oo wax looga qabto baahiyaha caafimaadka habdhaqanka bulshada si taageero dhaqameed leh. Maalgashiyadaan waxay dhameystiri doonaan shaqaalaha caafimaadka habdhaqanka ee la taaban karo oo laga yaabo inay heli karaan bulshooyinka Oregon iyadoo loo marayo sharciga hadda la tixgelinayo.

Bulshooyinka wajahaya baahiyaha shaqaale ee dhaafsan kuwa la xiriira caafimaadka habdhaqanka ayaa dooran kara inay maalgashadaan istaraatiijiyado kordhinaya helitaanka Shaqaalaha Caafimaadka Dhaqameed ee dhaafsan Khabiirrada Fayo-qabka Asaaga, sida Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada ee asaaga ama Dhaqaajiyeyaasha Asaaga. Hab fure u ah kordhinta tas'hiilaadka THW ayaa noqon kara in la taageero ka gudbida loogu talagay dadka galaya takhasuska THW iyadoo loo marayo waxbarasho, la-talin, iyo ka qorista gudaha dugsiyada sare ama kulliyadaha bulshada.

Tani maxay uga dhigan tahay xubnaha OHP? Maalgashiga barnaamijyada ama waxqabadyada ka jira gobolka oo dhan ee hagaajiya xaqsoorka caafimaadka ayaa wanaajin doona mahadhada, tayada iyo helitaanka daryeelka loogu talagalay xubnaha. Tani waxay si gaar ah run u tahay haddii ay jiraan taageerooyin laga helo shaqaalaha daryeelka caafimaadka habdhaqanka ee jawaab-celinta dhaqameed leh. Taasi waxay ka dhigan tahay in xubnuhu ay si fudud awood ugu yeelan doonaan inay helaan bixiyeyaal iyaga u eg oo sidooda u hadla, ku hadla luuqadooda, oo fahmaya mahadhooyinkooda.

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad weyn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir Barnaamijka Iska Kaashiga Wacyigelinta Bulshada community.outreach@dhsoha.state.or.us ama adoo wacaya 1-833-647-3678. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka hadalka dhibayo ama waxaad wici kartaa 711.